



UK Health
Security
Agency

NHS

Cagaarshowga B

Hagaha daryeelkaaga
inta aad uurka
leedahay iyo kadib
marka aad dhasho
ilmahaaga



immunisation

sida ugu badbaadada badan ee aad
u ilaalin karto naftaada iyo ilmahaaga





Maxaa ku jira/ku qoran buugyarahan?

- 4 Natiijada baaritaankaaga iyo waxa ay ka dhigan tahay
- 5 Waa maxay cagaarshowga B?
- 5 Sidee ayuu igu soo gaaray cagaarshowga B?
- 6 Qorshaynta daryeelkaaga
- 7 La socodka daawayntaada iyo daryeelkaaga
- 8 Daryeelka ilmahaaga
- 9 Jadwalka tallaalada ilmahaaga
- 10 Markaad guriga tagto
- 11 Yaa u baahan inuu ogaado?

Natijada baaritaankaaga iyo waxa ay ka dhigan tahay



Dhawaan waxaa lagaa qaaday baaritaano dhiig. Mid ka mid ah natijada baaritaanadaas ayaa muujisay in aad qabto caabuq loo yaqaan cagaarshowga B.

Buug-yarahaan ayaa kuu sharxi doona waxa cagaarshowga B uu yahay iyo waxa uu idin kaga dhigan yahay adiga, ilmahaaga iyo qoyskaagaba.



Buug-yarahaan waxaa ku jira macluumaad ku saabsan daryeelka aad u baahan doonto inta aad uurka leedahay si aad u ilaaliso caafimaadkaaga iyo daryeelka loogu baahan yahay ilmahaaga iyo xubnaha kale ee qoyska.

Inta aad uurka leedahay waxaa ku daryeeli doona koox takhasus leh oo kuu sharxi doona dhammaan macluumaadka ku jira buug-yarahaan, oo ay ka mid yihiin faahfaahinta daryeelka laga heli karo meesha aad ku nooshahay, waxayna kaaga jawaabi doonaan wixii su'aalo ah ee laga yaabo inaad qabtaan adiga ama lammaanahaaga.



Kooxda waxaa ku jiri kara umulisada baaritaanka, kalkaalisada takhasuska leh, dhakhtar ku takhasusay daryeelka beerka, umuliso, farmashiistaha iyo GP-gaaga, kalkaalisada caafimaadka iyo booqdaha caafimaadka.

Waa maxay cagaarshowga B?

Cagaarshowga B waa caabuq uu keeno fayras. Fayraska waa nooc jeermis ah oo sababi kara caabuq iyo cudur.

Fayraska wuxuu dhibaatooyin badan u keeni karaa caafimaadkaaga ah oo ay ka mid yihiin caabuqa (bararka) beerka waxayna taasi keeni kartaa dhibaatooyin xagga beerka ah oo aad halis u ah, oo ay ku jiraan nabarro (cirrhosis) iyo kansar. Beerka waa xubinta ugu weyn ee jirka waana mid aad muhiim u ah. Waxay qabataa shaqooyin badan oo ay ka mid yihiin:

- nadiifinta dhiigaaga
- soo saarista dheecaanka loo yaqaan “bile” si uu gacan uga gaysto dheefshiidka cuntada aad cunayso
- kaydinta sonkorta waxyaabaha aad cunto si aad tamar uga hesho

Sidee ayuu igu soo gaaray cagaarshowga B?

Caabuqa cagaarshowga B wuxuu ku badan yahay meelo ka mid ah adduunka. Infekshanku waa jirro aad ka qaadi karto qof kale. Wuxuu sidoo kale ku faafi karaa dadka kale.

Fayraska cagaarshowga B waxaa laga helaa dhiigga ama dheecaanada jirka ee qofka cudurka qaba. Dheecaannada jirka waa sida dhiigga, shahwada, candhuufta iyo dheecaannada xubinta taranka.

Laguma kala qaado dhunkashada, gacmaha is-qabsiga, hab isa-siinta, qufaca, hindhisada, ama wadaagida maacuunnada iyo alaabta cuntada.

Waxaa lagu faafin karaa siyaabahan:

- hooyada ayaa waxay u gudbin kartaa ilmaheeda inta ay uurka leedahay ama xilliga dhalmada
- xilliga galmada ee aan kondhomka la isticmaalin
- wadaagista cirbadaha ama qalabyada daawooyinka ee fayraska leh
- qalabyada aan nadiifka ahayn ee loo isticmaalo in dadka loogu saaro tattoo, duritaanada/ duleelinta jirka, ama daawaynta caafimaadka ama ilkaha
- waxaa lagu kala qaadi karaa xaddi yar oo dhiig ah oo saaran cadayga ama mandiilada/sikiinta
- qoyska dhexdiisa (ilmaha ayaa isku gudbin karaan) marka la joogo wadamada uu cudurku ku badan yahay



Qorshaynta daryeelkaaga

Aad bay muhiim u tahay inaad daryeesho naftaada iyo in aad ka xaadirta dhammaan ballamahaaga.

Kooxda takhasuska leh ayaa kaala shaqayn doonta sidii aad u qorshayn lahayd daryeelkaaga inta aad uurka leedahay iyo xilliga dhalmada.

Waxay ku siin doonaan macluumaad ku saabsan:

- sida aad ilmahaaga u ilaalin karto adigoo siinaya tallaallada (duritaanada) loo baahan yahay xilliga dhalmada iyo ilaa uu ka gaarayo 12 bilood jir
- baaritaan ku samaynta lammaanahaaga, carruurta kale ama xubnaha kale ee qoyska

Waxaad u baahan doontaa in lagugu sameeyo baaritaano kale oo dhiigga ah si si loo ogaado inta uu le'eg yahay fayraska cagaarshowga B ee ku jira dhiigaaga. Taasi waxay noo sheegi doontaa haddii aad leedahay caabuq faafitaankiisu hooseeya ama sareeya.

Waxaan markaas qorsheyn karnaa daaweynta iyo daryeelka idin ku habboon adiga iyo ilmahaaga iyadoo lagu saleynayo natiijooyinkan. Haddii heerka fayraska uu sarreeyo,

kooxdaada takhasuska leh ayaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan inaad qaadata kiniiniyo si heerarka fayraska hoos loogu dhigo. Waxaa sidoo kale lagugu samayn karaa iskaan si loo hubiyo caafimaadka beerkaaga.

Waxaan ku arki doonaa wakhti u dhow dhamaadka muddada uurkaaga si aan uga wada hadalno waxa dhici doona marka ilmahaaga uu dhasho waxaana kaaga jawaabi doonaa wixii su'aalo ah oo aad qabtid.

Cagaarshowga B ma saameeyo qaabka uu ilmahaaga u dhalanayo. Ma aha sabab keligiis ah in dhalmada dhalmada.

Waxaad u naas-nuujin kartaa ilmahaaga si badbaado leh. Aad bay muhiim u tahay inaad timaado dhammaan ballamahaaga ka dib marka ilmuhu dhasho si loo ilaaliyo adiga iyo ilmahaaga. Kooxdu waxay u joogaan inay ka jawaabaan su'aalaha adiga ama qoyskaaga aad qabto.



La socodka daawayntaada iyo daryeelkaaga

UK Health Security Agency (UKHSA, Hay'adda Ammaanka Caafimaadka ee UK) waxaa waajibaad sharci ah ka saaran fulinta la socoshada cudurrada faafa ee la ogaan karo, sida cagaarshowga B. Tani waxay la macno tahay in laga warhayo fayraska iyo cudurka si loo eego haddii uu isbeddelayo iyo in aan xaqiijino in tallaalka aan isticmaalayno uu yahay mid sii shaqeynaya.

Waa muhiim in la ogaado haddii fayraska uu u gudbay ilmahaaga, goorta iyo sida ay taasi u dhacday. Si aan sidaas u samayno waxaan ku waydiisan doonaa ogolaanshahaaga si aan muunado dhiig ah idin ka qaadno adiga iyo ilmahaaga si loogu diro baaritaan khaas ah:

Dhammaan haweenka iyo dhallaanka

- muunad yar oo dhiigaaga ah bilowga muddada uurka
- muunad yar oo dhiig ah oo laga qaado ilmahaaga marka uu gaaro 12 bilood jir
- Haddii aad caabuqaaqa uu sareeyo waxaanu sidoo kale u baahanahay:
- muunad yar oo dhiigaaga ah kadib dhalashada ilmahaaga
- 3 dhibcood oo yar oo dhiig ah oo laga qaadayo ciribta ilmahaaga marka aad dhasho*

Waxaa markaas lala barbardhigi karaa baaritaanka la sameeyn doono marka ilmuhu gaaro hal sano jir taasina waxay gacan ka gaysan doontaa saynisyahannada inay fahmaan sida uu fayrasku u dhaqmayo.

*Fiiro gaar ah: Muunadda dhiiga ee laga qaadayo dhallaankaaga marka ay dhashaan way ka duwan tahay muunad ka qaadista 'cirib ah' ee laga qaado marka ilmahaagu 5 maalmood jir yahay, aad bayna muhiim u tahay in ilmahaaga uu qaato baaritaankaas sidoo kale.



Daryeelka ilmahaaga

Caabuqa Cagaarshowga B waa laga hortagi karaa haddii aad xaqiijiso in ilmahaaga uu wakhtigii loogu talagalay qaato tallaallada.

Tallaalladu waxay si weyn u dhimi doonaa fursadda ah in ilmahaaga uu qaado cudurka.

Carruurta ay dhalaan hooyooyinka qaba cagaarshowga B waxay u baahan yihiin difaac dheeraad ah. Cirbadaha dheeraadka ah waxaa si toos ah loo siinayaa isla marka ay dhashaan ilmahaaga iyo marka ay 4 toddobaad iyo 12 bilood jir noqdaan.

Haddii aad lahayd heerar aad u sareeya oo fayraska ah intii aad uurka lahayd, ilmahaaga waxa uu sidoo kale u baahan doonaa cirbad kale oo dheeraad ah oo loo yaqaan hepatitis B immunoglobulin (HBIG) wax yar kadib marka ay dhashaan.

Marka ilmahaaga uu gaaro 8 toddobaad jir waxay bilaabi doonaan qaadashada tallaallada caadiga ah ee carruurnimada kuwaas oo dhammaan carruurta la siiyo. Kuwaas waxaa ku jira tallaalka cagaarshowga B.

Xusuusnow:

Laba iyo toban bilood jir, marka ilmahaaga uu qaato dhammaan tallaalladooda, waxaa loo baahan yahay baaritaan dhiig si loo eego haddii ilmahaagu qabo ama uusan qabin caabuqa cagaarshowga B.



Jadwalka tallaalka ilmahaaga

Ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa wadar ahaan 6 talaal si looga ilaaliyo cagaarshowga B. Aad bay muhiim u tahay in ilmahaaga uu qaato dhamaantood.

Tallaalka 1 – tallaalka cagaarshowga B oo keliya ah

Inta uusan ilmuhu hal maalin gaarin oo uu ku jiro isbitaalka. Ilmaha qaarkood waxay u baahan yihiin cirbad labaad oo ah immunoglobulin (HBIG) si ay sidoo kale u helaan difaac dheeraad ah.



1 maalin

Tallaalka 2 - tallaalka cagaarshowga B oo keliya ah

Markuu 4 usbuuc jirsado - xaqiiji inaad ilmaha ka diiwaangeliso GP.



4 todobaad

Tallaalka 3

Markuu usbuuca 8 gaaro wuxuu qaadanayaa tallaallada caadiga ah ee carruurnimada oo uu ku jiro tallaalka cagaarshowga B.



8 toddobaad

Tallaalka 4

Markuu usbuuca 12 gaaro wuxuu qaadanayaa tallaallada caadiga ah ee carruurnimada oo uu ku jiro tallaalka cagaarshowga B.



12 toddobaad

Tallaalka 5

Markuu usbuuca 16 gaaro wuxuu qaadanayaa tallaallada caadiga ah ee carruurnimada oo uu ku jiro tallaalka cagaarshowga B.



16 toddobaad

Tallaalka 6 - tallaalka cagaarshowga B oo keliya ah

Marka uu jirsado 12 bilood, ilmahaagu waxa uu sidoo kale u baahan doonaa in laga qaado dhiig si loo eego in uu qabo cagaarshowga B. Tani aad bay muhiim u tahay.



12 bilood



Xusuusnow inaad buuggaaga cas u qaadato dhammaan ballamaha ama xusuusi xirfadlayaasha caafimaadka inay kuugu buuxiyaan khadka.

Markaad guriga tagto

Diwaangeli dhalashada ilmahaaga

Dhammaan dhalashooyinka ka dhaca gudaha England, Wales iyo Waqooyiga Ireland waa in lagu diwaangaliyo 42 maalmood gudahooda marka ilmaha uu dhasho. Haddii aad xaas tahay ninkaaga ayaa samayn kara arrintaas. Waxaa lagu siin doonaa shahaadada dhalashada.

Ilmahaaga ka diwaangeli GP-gaaga

Adiga iyo ilmahaaga waxaad u baahan tihiin inaad iska diwaangelisaan GP-ga si loo xaqiijiyo inaad heshaan dhammaan daryeelka aad u baahan tihiin.

Diwaangeli ilmahaaga isla marka uu dhasho si aad u ballansato tallaalka ilmaha la siiyo markuu 4-toddobaad jirsado. Arrintaan waxay fududaanaysaa haddii aad haysato shahaadada dhalashada. U sheeg umulisaadaada ama booqdaaha caafimaadka haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto arrintaas.

Daryeelka mustaqbalka

Waa muhiim inaad ilaaliso oo aad ka xaadirta dhammaan ballamaha laguu qorsheeyay adiga iyo ilmahaaga oo ay ku jiraan ballamaha isbitaalka ee kooxda takhasuska leh.

Adiga iyo ilmahaaga waxaad u baahan doontaan booqashada GP-gaaga marka ilmaha uu jirsado lix toddobaad si loo hubiyo in wax walba ay hagaagsan yihiin dhalmada kadib.

Yaa u baahan inuu idin ogaado adiga iyo ilmahaaga?

Waxaan u baahanahay inaan u sheegno qof kasta oo ku lug leh daryeelkaaga iyo daryeelka ilmahaaga inaad qabtid cagaarshowga B si aan:

- u qorshayno oo aan bixino daryeelkaaga
- kooxaha takhasuska leh ula qorshayno dhammaan ballamaha aad u baahan tahay
- u qorshayno dhammaan ballamaha daryeelka iyo tallaallada ilmahaaga ee mustaqbalka.

Waxaan u baahanahay ogolaanshahaaga si aan xirfadlayaasha kale ugu sheegno inaad qabto cagaarshowga B. Xirfadlayaashaas waxaa ka mid ah:

- GP-ga
- booqdahaaga caafimaadka
- Adeegga Macluumaadka Caafimaadka Carruurta oo diiwaangeliya dhammaan tallaallada ilmahaaga iyo natiijooyinka baaritaanada dhallaanka

Hay'adda UK Health Security Agency waxay uruurisaa macluumaad si loo xaqiijiyo in barnaamijyada baaritaanka iyo tallaal bixinta ay u noqdaan kuwo badbaado iyo waxtar leh.

Ogow sida Hay'adda UK Health Security Agency iyo NHS-ta u isticmaalaan una ilaaliyaan macluumaadkaaga
www.gov.uk/phe/screening-data



Macluumaad

NHS

www.nhs.uk/conditions/hepatitis

Diiwaangelinta dhalashada ilmahaaga

www.gov.uk/register-birth

GP ka diiwangelinta ilmahaaga

www.nhs.uk/using-the-nhs/nhs-services/gps/how-to-register-with-a-gp-practice/

Diiwaanka caafimaadka ilmahaaga (buugga cas)

www.nhs.uk/conditions/pregnancy-and-baby/baby-reviews/#the-personal-child-health-record-red-book

